Su´aalo ku saabsan xoog adeegsi (gacan ka hadal)

Xoog adeegsiga ka dhex dhaca dadka xiriirka dhow leh wuxuu saamayn ku yeelanayaa caafimaadkaaga jireed iyo nafsiyadeed, sidaas darteed baan kuu waydiinaynaa. Waxay sidoo kale saamayn ku yaalanayaa carruurtaada caafimaadkooda jireed iyo nafsiyadeed. Carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay ku koraan xoog adeegsi la´aan. Xoog adeegsi wuxuu noqon karaa in adiga xoog laguu adeeegsado ama aad aragtid qof kale oo loo gaysanayo. Xoog adeegsiga waxaa lagu gaysan karaa weji ka weji iyo iyadoo loo marayo madallooyinka dijitaalka ah. Waxaad sidoo kale heli kartaa taageero haddii ay cid xoog kuu adeegsatay ama aad aragtay ama maqashay iyadoo xoog loo adeegsanayo qof aad isku dhowdihiin markii aad soo koraysay. Waxaad sidoo kale adigu shaqsiyan heli kartaa caawinaad haddii aad adigu qof kale xoog u adeegsatay.

Qof aad isku dhowdihiin waxaan ka wadnaa saaxiib xiriir idinka dhexeeyo, qof qoyska ka tirsan, qaraabo ama qof kale oo muhiim ah.

1. Ma lagu soo hanjabay, lagu kontoroolayay, lagu bahdilay, lagu faduuliyay ama wax la mid ah oo uu kuu gaystay qof aad isku dhowdihiin?

❒ Haa

❒ Maya

2. Ma lagu qabqabtay, lagu kala tuuray, lagu garaacay, lagu laaday ama dhaawac si un kugu gaystay qof aad isku dhowdihiin?

❒ Haa

❒ Maya

3. Ma dareentay cadaadis ama lagugu khasbay ficillo galmo ah oo uu kuu gaystay qof aad isku dhowdihiin?

❒ Haa

❒ Maya

4. Xoog ma kuu adeegsaday qof aynaan isku dhawayn, sida ku cad su´aalaha 1-3?

❒ Haa

❒ Maya

5. Markii aad soo koraysay ma aragtay ama ma maqashay qof aad isku dhowdihiin oo loo adeegsanayo xoog sida ku cad su´aalaha 1-3?

❒ Haa

❒ Maya

6. Adigu shaqsiyan qof wayn ahaan qof kale xoog ma u adeegsatay sida ku cad su´aalaha 1-3?

❒ Haa

❒ Maya

7. Ma loo adeegsaday xoog (gacan ka hadal) carruur kula deggan ama kula degganayd sida ku cad su´aalaha 1-3?

❒ Haa

❒ Maya

Haddii ay jiraan wax aad ka fikaraysid ama aad rabtid inaad soo hadal qaadid, ku qor bogga danbe.

Waad ku mahadsan inaad ka jawaabtay su´aalaha!

©VKV - Västra Götalandsregionens kompetenscentrum om våld i nära relationer 2026